# Adeegyada Ka Caawinta Luuqadda

www.rtd-denver.com/language-access

Language.services@rtd-denver.com

303.299.6000

## Sida Loo Beddelo Luuqada Barta Internetka ee Biraawsarkaaga


Google Chrome ........................................ 1
Mozilla Firefox ........................................ 4
Microsoft Edge ........................................ 6
Apple Safari ........................................ 9


### Google Chrome

1. Fur biraawsarkaaga Google Chrome.
2. Dhinaca geeska sare ee midig ee shaashada, guji astaanta ⋮ .
3. Liiska hoos-u-dhaca ee soo muuqda, ka dooro **Settings**.
4. Shaashada xigta, guji hoos-u-dhaca Advanced.
5. Guji qeybta *Languages*.

6. Gudaha qeybta *Languages*, guji **down arrow** ee dhanka midig ee doorashada *Language*.




7. Gudaha liiska soo muuqda, guji xiriiriyaha Add languages.

8. Shaashada xigta, dhagsii sanduuqa calaamadaynta ee ku xiga hal ama in ka badan luuqad(dood) (A), ka dibna guji badhanka **Add** (B).



9. Luuqadahaaga cusub ee aad dhawaan dooratay waa inay ka muuqdaan gudaha liiska *Language*. Si aad mid u doorato, guji astaanta dhanka midig ee luqadda oona calaamadee sanduuqa ku xiga **Display Google Chrome in this language**.




10. Guji **Relaunch** ama xir oona dib u fur biraawsarkaaga Chrome-ka si aad u muujiso luqadda cusub.

## Mozilla Firefox

1. Fur biraawsarkaaga Mozilla Firefox
2. Guji astaanta ☰ ku taal geeska sare ee bidix ee shaashada biraawsarka.
3. Ka dooro **Settings** liiska hoos-u-dhaca ee soo muuqda.
4. Hoosta qeybta *Language*, guji badhanka Choose... .




5. Gudaha shaashada, guji **Select a language to add**.



6. Dhagsii luqadda aad rabto (A), guji **Add**, ka dibna dhagsii badhanka **OK** (B).




7. Dib u billow biraawsarkaaga si aad u muujiso luqadda cusub.

## Microsoft Edge

1. Fur biraawsarka Microsoft Edge.
2. Guji **Settings and more icon** ··· ee geeska sare ee midig ee shaashada biraawsarka.
3. Gudaha liiska hoos-u-dhaca, ee u dhow xagga hoose, dooro **Settings**.



4. Dhinaca bidix ee shaashadda, hoosta *Settings*, guji **Languages**.




5. Hoosta qeybta *Languages*, guji badhanka **Add languages**.



6. Gudaha waxa sida degdega ah u soo muuqda, dooro luqadda(daha) aad rabto in biraawsarku muujiyo, ka dibna dhagsii badhanka **Add**.




7. Dib ugu soo noqo qaybta Luuqadaha, hel luqadda aad doorbidayso oo guji  astaanta ah dhanka midig. Kadib, calaamadee sanduuqa ku xiga **Display Microsoft Edge in this language.**
8. Guji badhanka 

ama xir oo dib u fur biraawsarka.

## Apple Safari

Safari waxaa lagu dhex milay macOS. Sidaas awgeed, waa inaad gashaa goobaha luqada ee dejinada Mac-kaaga si aad u bedesho luqadda lagu muujiyo Safari.

1. Dhinaca geeska bidix ee sare ee shaashadda, dhagsii astaanta Apple si aad u furto liiska Apple oona dooro **System Preferences**.




2. Guji **Language & Region** gudaha shaashada *System Preferences*.



3. Gudaha liiska *Language & Region*, ee hoosta **Preferred languages**, guji **+ sign** ee xagga hoose ah.



4. Liiska hoos-u-dhaca, dooro luqad, ka dibna dhagsii badhanka **Add**.




5. Waa in si degdeg ah fariin lagugu soo diraa si aad ugubeddelato luqadda cusub. Haddii kale, guji-oona-jiid luqadda cusub xagga sare ee liiska ee shaashaddii hore (lagu muujiyay tallaabada 3).




6. Guji badhanka **Restart Now** si habaynta luqadda cusubi ay u hirgasho.

